

33 Nasteexo oo ku saabsan la qaabka loola dhaqamayo Waalidka

[Soomaali - Somali -]

Maxamed Axmed

2014 - 1435

IslamHouse.com

٣٣ خطوة للتعامل مع الوالدين

« باللغة الصومالية »

محمد أحمد

2014 - 1435

IslamHouse.com

33 Nasteeexo oo ku saabsan la qaabka Ioola dhaqamayo Waalidka

Bismilahaahi raxmaani raxiim:

Sadex iyo sodon talaabo oo kuu sahlaya sidaad ugu samafali lahayd waalidkaaga.

- 1- Dhagayso hadalkooda, marka ay hadlayaan.
- 2- Rayigooda ka aqbal mar walba.
- 3- Marka aad eegayso hoos madaxa u dhig.
- 4- Inaad u amaanto si joogto ah.
- 5- In lala wadaago farxadooda.
- 6- Ha ka sheegin war aan haboonayn.
- 7- Inaad amaanto saaxiibadooda ay jecel yihiin.
- 8- In la xasuusiyo horumarkii ay hore u sameeyeen.
- 9- Ia qaybsa xanuunkooda mar walba.
- 10-In aanad xasuusin meelihii ay ku gabood faleen noloshooda.

- 11-Meesha ay fadhiyaan ha ku mashquulin wax ka baxsan hawsha taala meeshaas.
- 12-In loola fadhiyo si ixtiraam ku dheehan tahay.
- 13-In la tuso in ay tahay afkaartoodu mid sax ah had iyo jeer.
- 14-In aan lagu dhex goyn sheekada ay wadaan.
- 15-In la baro ubadka yaryar sida ay ula dhaqmayaan.
- 16-In aan lagu garaacin ubadka yar yar hortooda.
- 17-In laga qaato nasteexo kasta oo ay soo jeediyaaan.
- 18- Meesha ay fadhiyaan cida maamulaysaa in ay iyaga ahaato.
- 19-In aan codka kor loogu qaadin.
- 20-Marka la socdo in aan laga hor marin talaabada.
- 21-Marka la cunayo inaan laga hor marin gacanta.
- 22-Indhaha in aan lagu gubin, oon si xun loo fiirin.
- 23-In lagu faano , in ay yihiin kuwa ku dhalay.
- 24-Marka meel lawada fadhiyo inaan lugta lagu fidin.
- 25-In aan loo soo jiidin wax dhibaateeyaa.
- 26-In loo duceeyo mar walba.

- 27-Inaan la tusin in la dhibsanayo marka lawada joogo.
- 28-In aan lagu qoslin hadii ay ka soo baxaan fal aan haboonayn.
- 29-In loo adeego iyagoon kaa dalban.
- 30-In la badiyo booqashadooda mar walba.
- 31-In lagula hadlo kalmadaha ixtiraamka huwan.
- 32-In loogu yeedho qaabka ay ugu jecel yihin.
- 33-In laga hor mariyo qof walba meesha ay joongan.

Ogow waalidkaagu waa dheeman dhulka dushiisa yaala ka faa'idayso inta aanan ciida lagu aasin.

Xaqa labaad ee xaqa llaahay ku xigaa waa xaqa waalidka , marnaba ha ku gabood falin, baro oo ku dhaqan.

Wabilaahi tawfiiq.